Taageerida Bulshadeena: Adeegyada Fayoobida iyo Badqabka

Taageerida iskaashiga iyo barnaamijyada ku takhasusay bixinta helitaan badbaado leh oo lagu dhimayo waxyeelada iyo adeegyada tijaabinta. Bixinta maalgelinta ee waxyaabahan soo socda: si badbaado leh in loo tuuro irbadaha la isticmaalay, helida irbadaha la nadiifiyay iyo agabyada kale ee badbaadada leh ee la isticmaali karo, alaabaha lagu daryeello dhaawaca, alaabaha nadaafadda, alaabaha daawooyinka narcan/naloxone, alaabaha galmada ee badbaadada leh iyo wixii lamid ah. Waxaa intaasi ku sii dheer u qoondee lacago dadka wax baarayaa si ay si bilaash ah ugu helaan adeegyada STI, HIV, Hep C (dadka aan lahayn calaamado firfircoon), tababarka daryeelka dhaawaca, tababarka iyo barnaamijyada bixinta daawada naloxone. Maalgelinta dheeraadka ah ee adeegyada la-talinta dhimista khatarta oo ay ku jiraan kuwa la soo gudbiyay oo lagu sameynaayo kharash la'aan/qiimo jaban, daryeel caafimaad oo la heli karo iyo caafimaadka dhimirka. Barnaamijyada la isweydarsado ee jira iyo adeegyada xarumaha bulshada ee horeyba u jiray, si kastaba ha ahaatee waxay u baahan yihiin maalgashi xoogan. In mudnaanta la siiyo barnaamijyadan la aasaasay ayaa ah muhiimada ugu badan.

Qiimaha: $500,000

---

Waa tan si ay uu Cawiso ($2,000,000)
Barnaamij dhisayo nidaamyada taageerada iyo meelo badqab leh oo loogu talagalay xubnaha bulshooyinka la hayb sooco, kuwaas oo daraasadba daraasadka ka dambeeya uu muujiya inay si xad dhaaf ah khatar ugu jiraan waxyeello daran amaba dhimasho sababi karta wakhtiyada ay waxyaabo murugo leh la soo dersan. Bulshooyinka noocan oo kale ah waxay u baahan yihiin shabakad isku xiran oo kooxaha gargaarka wadaaga ah, taageerada asxaabta deriska, iyo xirfadlayaasha caafimaadka dhimirka kuwaas oo ka soo jeeda asal la mid ah si ay ula taliyaan una tababaraan sidii ay isu ilaalin lahaayeen, si waxyeellada waarta ee murugta loogu gudbiyo jihooyinka bogsashada.

Murugada waa dhibaato caafimaad dadweyne oo baahsan, waxyeelo leh qaalina ah. Uma kala socna da', jinsi, heerka dhaqan-dhaqaale, jinsiyad, qowmiyad, juqraafi, nooca galmada, ama naafanimada. Murugada ayaa si gaar ah ugu baahay bulshooyinka la hayb sooco, maadaama nidaamyada dulmigu ay laftoodu yihiin kuwo murugo leh, taariikhda dulmigaasina ay saamayn is biirsaday ku yeeshaan bulshooyinka qarniyaal badan.

Soo jeedintan ayaa maalgalin doonta kooxaha bulshada kuwaas oo si fiican u go'aamin kara habka ugu faa'iidada badan bulshooyinkooda. Waxaa xooga la saari doonaa dhaqamada dhamaystiran, ku salaysan caddaymaha iyadoo la adeegsanayo la-taliyayaasha murugada xirfadlayaasha ah iyo kooxaha gargaarka wadaagga ah ee heer xaafadeed si isku mid ah.

Qiimaha: ($2,000,000)

---

Rayidku ee Maaha Kooxda ka Jawaabista Qalalaasaha Booliiska - Xarunta Badbaadada iyo Isgaarsiinta

Rayidku ee Maaha Kooxda ka Jawaabista Qalalaasaha ee Booliiska waxay ka caawin doontaa kuwa la takooro, taariikh ahaan aan loo adeegin, ama xubnaha bulshada ee khatarta ku jira ee la kulma dhibaatooyinka (iyo inay ka caawiyaan inay ku xirmaan taageerada ka dib), iyada oo aysan ku lug lahayn hay’addaha sharci fulinta.
Xubnaha bulshada la hayb sooco waxay aad suurtagal uu tahay in la waxyeeleeyo markay booliisku ka jawaabaan dhibaatooyinka caafimaadka dhimirka, caro dadwaynaha (badanaa loo baahan yahay-ama murugadu-horseedo), ama dhaqamada aan had iyo jeer la sharraxin ama la fahmin. Jawaab celinta dhaqan ahaan karti u leh, xog-ogaal uu ah murugada,
naxariis-ku-salaysan, asxaabta-taageeran waxay ballan qaadaysaa natiijooyin wanaagsan, oo muddo dheer iyo mid gaabanba ah. Marka nala soo waco, daaweeye tababbaran/shaqaale bulsho, kalkaaliye/dhakhtar saaxiib ah lehna khibrad noololeed ayaa ah kan ugu horreeya ee jooga goobta.

Qiimaha: $2,000,000

---

Taageerada Guriyeynta ee Dhallinyarada: Nidaamka Hoyga ee Dhammaystiran oo ay Wada-Sameeyeen iyo loona sameeyay Dadka Qaangaarka ah ee da'da yar si loo Hubiyo Guri Xoogan.

Dhallinyarada iyo Dadka Qaan gaarka ah ee Da'da Yar ee Taariikh ahaan Hoy la'aanta ah (HYYA) waxay ka yimaadan gabowga ka baxay nidaamka xoojinta daryeelka, adeegsiga guuldareystay iyo/ama inay ka cararaan xaalado nololeed oo aan badqab lahayn. Qaar badan oo iyaga ka mid ah waxay ka digtoon yihiin guryaha la ururiyey iyo kuwa waa weyn ee HYYA.Soo jeedintan waxey ujeedadeeda tahay in la kordhiyo meelaha badqabka leh ee HYYA si ay u helaan adeegyada ay ogaadeen in loo baahan yahay, gaar ahaan qabka guryaha la wada seexdo ama la wadaago ee leh guryo madax bannaan oo la la naqshadeeyay HYYA.
Guriyeynta Bulshada PDA ee dhawaan la sameeyay ayaa iyada isa-siineysaa mashruucan oo kale, iyada oo la socota hay'ad adeeg toos ah oo khibrad u leh dayactirka guryaha la awoodi karo. Guriga-uu-eeg-POD ama qaab-dhismeedka guryaha la wada seexdo oo kale ah ayaa laga yaabaa inuu bixiyo asturnaanta iyo bulshada ay dadka deggani rabaan uuna baahan yihiin nidaamka hoyga xoogga ku salaysan ee ay sameeyen iyo loona sameeyay HYYA laftooda

Qiimaha: $2,000,000

---

Hindisaha Farsamada Loo dhan yahay ee Seattle

Qaybta tignoolajiyada ayaa aad ugu baahnayd hab cusub oo ka sarre mara barnaamijyada tababarka caadiyan si loo kordhiyo ka qaybgalka bulshooyinka lagu bartilmaameedsaday cunsuriyadda nidaamsan iyo mida rasmiga ah, laakiin wax ka qabta arrimaha aasaasiga ah ee cunsuriyadda rasmiga ah iyo isir nacaybka ku geedaman shaqaaleysiinta dawladda iyo bahda tignoolajiyada. Barnaamijka la soo jeediyay ayaa bixin doona:

1. tabarrada lacagta lagu qaato ee shaqooyinka tignoolajiyada ee hay'adaha dowladda ee leh siyaasado xoog leh oo ka dhan ah takoorka iyo shirkadaha doonaya in ay baabi'iyaan midab takoorka, isir nacaybka, iyo eexda kale ee rasmiga ah ee lagu dhisay habka qorista iyo shaqaaleysiinta;
2. suuqa shaqadu wuxuu kori doonaa markii meesha laga saaro xannibaadaha da'da iyo shaqaaleysiinta shakhsiyaadka, doonaya inay beddelaan shaqadooda ama bartaan xirfadaha tignoolajiyada kuwaas oo aan dhawaan lagu beddeli doonin AI;
3. In ardayda qalin jebisay la siiyo lacag ay shaqo ku bilowdan, iyo caawimada dhanka asxaabta farsamada iyo la-talin si ay u sameystan ganacsigooda oo ay u dhaqman sidii qandaraaslayaal madax bannaan.

Qiimaha: $500,000

---

Wax ku beerashada magaalada iyo Sinnaanta Cuntada ee dadka aan loo adeegin

*Mashruucani waxa uu kireyn doonaa meelo banaan oo cagaar ah oo aan la isticmaalin si looga soo saaro cuntada bulshada.* Bixinta dhul, meel iyo lacag loogu talagalay inay guryaha magaalada ku yaalla dhexdooda ama dibeddooda ay wax ku beertan iyo qaybintooda waxay abuuri doontaa ganacsiyo cusub oo bulshadu leedahay, ganacsiyo BIPOC ah oo iskood isku filan, cunto soo saarid, in baakado la geliyo, la qaybiyo iyo la suuq geyo waxaana cunto cusub oo loogu talagalay heli doonaa dadka go'doonsan iyo in la bixiyo qalab wax-ku-ool ah oo lagu tababaro jiil cusub oo beeraley ah.

Marka loo eego xaashida xaqiiqda ee cadaalada bey'ada ee Magaalada Seattle ee qiimaha cuntada:

*"Magaalada Seattle waa in ay wax ka qabataa la laabashada lacigihii taariikhiga ahaa ee lagu maalgeliyay bulshooyinka BIPOC taasoo uga sii dartay helitaan la'aanta joogtada ah iyo awood u helidda lahaanshaha dhulka ee guriyeynta iyo beerashada cuntada."*

Qiimaha: $7,000,000

---

Sanduuqa Caawinta Dhaqaalaha ee dadka Murugada la Aamusan

Sii dakhliga degdega ah ee dheeraadka ah shakhsiyaadka iyo qoysaska dhibaataysan. Deeq hal mar ah oo dhan $1,000.00 ayaa loo qaybin doonaa 400 oo qoys

1. Lacagaha ka caawin kara shakhsiyaadka inay ka gudbaan buuraha maaliyadeed waxeyna bixisaa faa'iidooyin maaliyadeed oo waara: Tusaalooyinka kuma koobna: dayactirka gaariga degdega ah; khidmadaha shatiga darawalnimada ama shatiga xirfadlaha; sumadaha baabuurka, khidmadaha ururka, daryeelka degdegga ah ee ilmaha, ka hortagga ka saarida, qalabka shaqada
2. Qaatayaasha waxaa la wareysan doonaa inta lagu guda jiro bisha ugu dambeysa ee mashruuca si loo ogaado saameynta lacagaha ay ku leeyihiin noloshooda.

Cilmi baaristu waxay muujisay in qoysas badan, gaar ahaan kuwa bulshooyinka BIPOC in ay hal jeeg oo lacag ah uu jiraan musiibo maaliyadeed.

Cilmi baaris ayaa muujisay in 59% qoysaska ay hal jeeg oo lacag ah uu jiraan hoy la'aan. Boqolkiiba shaki kuma jiro in ay sareeyan haweenka iyo Shaqsiyaadka BIPOC.

3. Barnaamijkan waxaa suurtagal ah in lagu dhex daro barnaamijyada Magaalada ee jira kuwaas oo maamula barnaamijyo la mid ah oo bixiya dhaqaalaha degdegga ah ee kirada, lacagaha biilasha, iyo baahiyaha kale.

Qiimaha: $500,000

---

Baaldi Lacageedka Bulshada Seattle (SCCB), Aaminadda Bulshada ee Dhisidda Hantida Guud

Baaldi Lacageedka Bulshada Seattle “SCCB” waxay ujeedadeedu tahay inay maalgashato iibsashada dhulka, iyo lahaanshaha guryaha si ay uga shaqeyso ganacsi lacag caddaan ah u soo saari doona bulshooyinka lagu bartilmaameedsaday cunsuriyadda habaysan iyo tan rasmiga ah waxeyna ka hor istaagtay lahaanshahooda cadiyan ahaan jirtay ee guryaha, helitaanka raasamaal, waxbarasho, iyo shaqo.

SCCB waxa ay iibsan doontaa oo dib u dayactir ku samayn doontaa meheradaha ganacsi ee horey u jiray sida **kaalmaha shidaalka, dukaamada qaxwaha, maqaaxiyaha yar yar, iyo suuqyada khudaarta iyo miraha,** kuwaas oo noqon doona meherado ay bulshadu leedahay, oo ay bulshadu maamusho iyada oo ujeedadu tahay in dib loogu qaybiyo faa'iidada bulshada. Saami qaybsiga la soo saaray waxaa loo isticmaali doonaa in lagu iibsado ganacsiyo badan iyo/ama lagu maalgeliyo guryo la awoodi karo si loo sii wado soo saarista saami qaybsiga lacagta caddaanka ah ee la siin doono xubnaha.

Hadafka mashruucani waa in la dhiso hantida guud ee bulshooyinka lala beegsaday cunsuriyad nidaamsan iyo mid rasmi ah. Faraca Ameerikaanka la Addoonsaday (ADOS) iyo dadka kale ee BIPOC ma awoodaan inay abuuraan hanti sababtoo ah hayb sooca taariikheed sida u diidida lacagaha amaahda, degaamaynta dadka ladan, kala soocidda, waxbarashada, diidmada amaahda guriga, fursadaha maaliyadeed ee xaddidan, heerarka sare ee amaahda guryaha, heerka caymiska sare ee guryaha ee aan dheellitirnayn iyo baabuurta, canshuurta aan cadaaladda ahayn iyo nidaamka aan cadaalada ahayn.

Mashruucani waa hannaan maaliyadeed oo adag oo u adeega danaha dhaqaalaha bulshada; waxay mar mar u qaybin doontaa lacag caddaan ah dhammaan xubnaha u qalma. Intaa waxaa dheer, xubnaha u qalma waxa la maalgelin doonaa ganacsiyadooda sharciga ah ee bulshada dhexdeeda. Mashruucu wuxuu xaqiijin doonaa taageerada maaliyadeed ee xubnaha bulshada, iyadoo la xoojinaayo kobaca joogtada ah ee ilaha raasamaalka taasoo gacan ka geysan doonta horumarinta dhaqan-dhaqaale ee bulshada.

Mashruucani waa maalgashi istiraatiji ah oo si nidaamsan u kordhin doona wanaagga dhaqaale ee dadka deggan ADOS iyo bulshooyinka kale ee BIPOC ee ku nool Seattle ee laga hor istaagay inay dhistaan hanti guud.

Qiimaha: $7,200,000

---

Guryo la Awoodi karo/Goobaha leh Daryeelka Caafimaadka Maskaxda ee bulshooyinka taarikh ahaan dhaqaalahoodu liitaan.

Bixinta adeegyada hagidda guryaha iyo caawinta kuwa u baahan.

Kani waa hindise ay wado bulshadu ujeedadeeduna tahay in la siiyo hagidda guriyeynta iyo adeegyada caawinta kuwa u baahan. Mashruucan, waxaan raadineynaa inaan ku taageerno shaqsiyaadka si ay u helan guryo joogta ah iyada oo loo marayo kheyraadka la yaqaan iyo kuwa aan la isticmaalin labadaba

Qiimaha: $2,000,000

---

Musqulaha iyo kaalmaha nadaafada ee ay Bulshada Maamusho ee ay Bulshada Hoggaamiso 24 sac todobaadkii

Samee bulsho ku salaysan, maamul bulsho - 24 saac kaalmaha nadaafadeed iyo musqulaha. Ku marti qaad bulshooyinka inay ka qaybqaataan si firfircoon uga bixinta kharashaadka dayactirka.

Saddex jeer laab xadiga tas-hiilaadka musqulaha ee 24-kii saacba iyo kaalmaha

nadaafada ee gudaha iyo hareeraha magaalada Seattle. Halkii aad dhaqaale siin lahayd hay'ado sameynayaa ama horey u sameynayay wax la mid ah, sii dhaqaalaha uuna dhib mas'uuliyadda bulshooyinka u furan oo doonaya inay maamulaan tas-hiilaadka iyagoo la kaashanaya deriskooda iyo sidoo kale dadka aan hoyga heysan. Hay'adaha iminkanba bixinaya kaalmaha nadaafadda/qubeyska ayaa ku yaalla meelo kooban. Codaynta iyo ka qayb gelinta bulshada iyo xubnaha bulshada, deriska, saaxiibada, iyo sidoo kale kuwa aan hoyga heysan ayaa ka qayb qaadan kara oo iskaashan karaa si ay u sameeyan tas-hiilaad 24 saac ah oo badqaba oo si wanaagsan loo daryeelay.

Qiimaha: $7,200,000

---

<u>Barafka Gudaha lagu ciyaaro ee Bilaashka ah/Xarunta Bulshada</u>
Meel lagu kobciyo isku xirka bulshada taaso qof walba u heli karo. Sameynta garoon baraf ah oo bilaash ah/qiimihiisu jaban yahay. Taariikh ahaan goobta lagu ordo waxay taageereen bulshooyinka aan loo adeegin muddo tobanaan sano ah taas oo qaab qiimo jaban dadka isugu keento. Goobtan saddexaad waxay aasaas u noqon doontaa in bulshadu ay isu timaado oo ay hesho agab.

Qiimaha: $5,000,000

---

<u>Hagida Caafimaadka Dhimirka- Xarunta Badbaadada iyo Isgaarsiinta Bulshada</u>
Xarunta Badbaadada iyo Isgaarsiinta Bulshada ayaa maalgelin doonta ururrada asaasiga ah si ay uu helaan Hagaha Kheyraadka kuwaas oo kaabi doona adeegyada taageerada caafimaadka dhimirka/dhibaatada. Hagaha Kheyraadka ayaa uu sahli doona adeegyada iyo hay’addaha dhammaan inay sii helaan taageero.

Hagaha kheyraadku waxa ay siin doonaan adeegyo isku duuban dadka ka soo jeeda bulshooyinka taariikh ahaan laga faa'iidaysto iyada oo loo marayo barnaamijyo udub dhexaad uu ah bogsiin iyo ka qayb gelin.

Hagaha/Daryeelka Kadib wuxuu ka koobnaan doonaa:

- Hagaha kheyraadku ayaa hubin doonaa in hawluhu ay sii socdan iyagoo bixinayaa agab iyo waxbarasho uuna dhaqmaya sidii wakiilo si ay u hagaan geedi socodka
- Dhaqan-xog ogaal: taageero ku habboon oo ku qotonta cilaaqaadka jira iyo wixii lamid ah.
- Taageero dhammaystiran/siman oo ka timaadda taabashada/dhibaatada

iyada oo loo marayo barnaamijka daryeelka ka dib ee dhammaan adeeg bixiyayaasha/hay'adaha

Qiimaha: $2,000,000

---

Is-waafajinta Bulshooyinka: Bulsho & Dhaqan-Habeysan ee Lagu soo saaray Dadaallada Fayo qabka

Soo jeedintan waxa ay maalgalin doontaa ururada asaasiga ah si ay u qorsheeyaan, u habeeyaan, u martigeliyaan dadaallada fayo qabka bulshada iyo dhacdooyinka wanaajin doona tayada nolosha:

- Dhacdooyinka soo booda
- Adeegyada Alaabaha Meelaha la Geeyo
- Dhacdooyinka lagu-saleeyay bulshada
- Dhaqdhaqaaqyada isdhexgalka ee lagu saleeyay ka warqabka-fayo qabka
- Quruxda, kobcinta & wareegyada daaweynta
- Daawada dhamaystiran, ka fiirsashada, & dhaqdhaqaaqa
- Kobcinta shakhsi ahaaneed, fayo qabka dhaqaalaha, xirfadaha nolosha
- Bogsiinta jiilalka

Qiimaha: $2,000,000

---

Caafimaadka Dhimirka waa Muhiim: Bogsiinta taageerada ku hawlan ee bulshooyinka taariikh ahaan laga faa'iidaysto

Soo jeedintan waxa ay maalgalin doontaa mashaariicda dib u soo celinta kuna saleysan bogsiinta caafimaadka dhimirka iyo bixiyayaasha caafimaadka hab-dhaqanka ee ku saleysan bulshooyinka taariikh ahaan laga faa'iidaysto si ay u bixiyaan caymis ku haboon dhaqan ahaan iyo bulsho xog ogaal u ah caafimaadka dhimirka, helitaanka iyo taageerada sida:

- Baaritaanada bilaha ah, waxyaabaha soo booda ee bulshada dhexdeeda
- Bixinta adeegyada caafimaadka dhimirka ee dhaqanka-ku salaysan.
- Bixinta taageerada baahiyaha aasaasiga ah (cawimaada kirada/guriyeynta, tigidhada baska, kaararka hadiyadaha, kaararka raashinka lagu soo iibsado, iyo wixii lamid ah.)
- Caawinta iyo aqoonsiga waxyaabaha mudnaanta uu leh bulshooyinka taariikh ahaan laga faa'iidaysto
- Maalgelinta waxbarashada hab-dhaqanka iyo caafimaadka dhimirka ee dhaqanka xog-ogaalka ah iyo bixiyeyaasha ku habboon

Qiimaha: $2,000,000

---

Dareenkayga - Maalgelinta Barnaamijyada Caafimaadka Hab-dhaqanka & Taageerada Dhallinyarada iyo Dadka waa weyn

Soo jeedintan ayaa maalgalin doonta mashaariicda iyadoo la aqoonsanayo bixiyayaasha barnaamijka caafimaadka hab-dhaqanka ee ku jihaysan dhalinyarada iyo dadka waa weyn ee bulshooyinka taariikh ahaan laga faa'iidaysto lagana saaray bulshooyinka ka kooban:

- Kooxaha Taageerada Asxaabta/Murugada
    - Isbedelka dhalinyarada
    - Wareegyada soo celinta/bogsiinta
- Barnaamijyada
- Tababarka
- Horumarinta Hogaaminta Dhalinyarada
- La-talinta

Qiimaha: $2,000,000

---

Maalgelinta Barnaamijyada Xilliga dambe ee Habeenka ee ay Dhallinyaradu-hoggaamiso

Dhalinyaradu waxay u baahan yihiin waxyaabo badqabo oo ay ku baashalan habeenkii, gaar ahaan maalmaha dabayaqada isbuuca ah. Mashruucani waxa uu siin doonaa lacago ururada la shaqayn doona oo ka dhisi doona hogaamiyayaasha dhalinyarada si ay u qorsheeyaan, uga qaybqaataan, oo ay u qabtaan xafladaha xilliga dambe ee habeenkii ah ee dhalinyarada guud ahaan bartamaha Seattle ilaa Rainier Beach. Xafladahan waxaa qayb ka noqon doona fanaaniin, cunto, madadaallo, agabyada farshaxanka ee dhalinyarada da’dooda ay uu dhaxeyso 13 ilaa 18 sano jir. Waxay sidoo kale siin doonaan dhallinyarada fursad ay ku horumariyaan qorshaynta Xafladooda, suuq geyntooda, iyo xirfadaha ay soo bandhigan.

Qiimaha: $600,000

---

Beddelidda Cadaaladda: Furidda Rajada, Bogsiinta, iyo Awood-siinta Jiilka Soo Socda.

Mashruucani waxa uu maalgalin doonaa Ururada Ku Salaysan Bulshada (CBOs), Milkiilayaasha Keligood ah, iyo Qabanqaabiyayaasha Dhallinyarada iyadoo kafaala qaad maaliyadeed uu sameyn doontaa sidii ay u heli lahaayeen kooxaha bogsiinta iyo soo celinta ee dhalinyarada da'doodu u dhaxeyso 13 ilaa 24 sano jir si ay dib ugu soo

nooleeyaan muuqaalka cadaalada wax ka bedela ee Seattle iyada oo la siinayo goobo waxbarasho oo dib u soo celin doona beddeli doonana cadaaladda si dib loogu milicsado nidaamyada, agabyada/adeegyada dhimista waxyeelada, iyada oo la xoojinayo laguna saleynaayo codadka dhallinyarada iyo qoysaska BIPOC ee ay sida aadka ah u saameeyeen cadaalad darada nidaamsan iyo booliiska.

Qiimaha: $2,000,000

---

Barnaamijyada ku Saleysan Dhallinyarada iyo Xarunta Dadka Asalka ah

Xaruntani waxa ay u adeegi doontaa sidii xarun uu firfircoon hawlaha, iyada oo fududayn doonta isku xirka bulshada u dhalatay magaalada, iyada oo sidoo kalena soo dhawayn diiran u samayn doonta shakhsiyaadka ka soo jeeda meelo kala duwan.

Qiimaha: $7,200,00